# SAFARKA RA'IISUL WASAARE KU-XIGEENKA AHNA WASIIRKA KALLUUMAYSIGA IYO KHEYRAADKA BADDA EE INDONESIA

09 May 2009 ayuu Prof. Cabdiraxmaan Aadan Ibbi, Ku-Xigeenka Ra'iisul Wasaaraha, ahna Wasiirka Kalluumaysiaga iyo Khayraadka Badda booqasho rasmi ah ku yimid magaalada Jakarta ee Indonesia. 10 May 2009, wuxuu kulan qado sharaf iyo soo dhoweyn ah ku yeeshay safaaradda Jamhuuriyadda Soomaaliyeed ee Indonesia oo uu ku soo dhoweeyay Danjire Maxamuud Colow, Danjiraha Jamhuuriyadda Soomaaliyeed ee Indonesia. Qadosharafta soo dhoweynta aheyd waxaa ka soo qeybgalay hawlwadeennada Safaaradda, xubnaha wafdiaga Wasiirka iyo qaar ka mid ah Jaaliyada Soomaaliyeed ee ku dhaqan wadankan Indonesia.

11 May 2009, wafdiga oo uu hoggaaminayay Ra'iisul Wasaare Ku-Xigeenka ayaa waxay gaareen magaalada Manado, oo uu ka dhacayay shirka Wasiirada Kalluumarysiga iyo Kheyraadka Badda, waxaana halkaasi ku soo dhoweeyay Wasiirka Wasaaradda Kalluumaysiga iyo Arrimaha Badaha ee Indonesia Dr. Freddy Numberi.

12 May 2009, wasiirka iyo wafidgiisa waxay u hawl hawlgaleen sidii ay gooni gooni ugu arki lahaayeen Madaxda ka socotay wadamada caalamka, una gaarsiin lahaayeen baahida dawladda iyo shacabka Soomaaliyeed ay u qabaan taageerada wadamada aan walaalaha nahay iyo kuwa aan saaxiibada nahayba.



Wuxuu wasiirku ka billaabay kulankiisa fadhi gaar ah oo uu la qaatay dhiggiisa Dr. Fredy Numberi ee Indonesia, mahadcelin iyo bogaadin oo uu Wasiirku bogaadiyay Indonesia qabashada iyo martigelinta shirkan ayuu Wasiirku hordhigay Indonesia in ay Soomaaliya u baahan tahay gacan walaaltimo oo ay dawladda Indonesia u fidiso walaalaheed Soomaaliyeed, gaar ahaan arrimaha ugu adag xilligan taagan ee dhibaatada badda Soomaaliyeed, maadaama ay Indonesia waqti ka hor wax

ka qabatay dhibaatadii badeed ee ka jiri jirtay Malacca Strait, khibradna u leedahay xallinta arrimaha burcad-badeeda. Mr. Numberi ayaa isna ka mahadceliyay ka soo qeybgalida Soomaaliya iyo sharfida ay ku sharaftay dawladda Soomaaliyeed in uu wafdigeeda soo hogaamiyo Ra'iisul Wasaare Xigeen, taas, ayuu ku tilmaamay Wasiirku, in ay muujinayso xiriirka adag ee ka dhexeeya labada shacab, wuxuuna ballan qaaday in uu madaxda ka sareyso kala hadli doono arrinta, ayna si deg deg ah guddi ugu saari doonaan arrimahaas sida ay dawladda Indonesia gacan uga geysan lahayd.

Wuxuu sidoo kale Wasiirku Tilmaamay in kalluumaysiga sharci-darrada ah ee ka jira biyaha Soomaaliyeed ay la mid tahay dambiga caalamiga ah ee looga soo horjeedo Money Laundering, maadaama ayuu yiri wasiirku kalluumaysigaasi uu dhalayo lacag faro badan oo ay helayaan maraakiibta sharci-darrada ah.




Shirka ayaa si rasmi ah u furmay, waxaana furitaanka shirka ka soo qeybgalay Madaxweynaha Indonesia Dr. Susilo Bambang Yudhoyono, Wasiirka Xiriirka Arrimaha Bulshada ee Indonesia Md. Rizal Bakrie, Wasiirka Arrimaha Dibedda Dr. Hassan Wirajuda, Wasiirka Kalluumayisga iyo Arrimaha Badaha Dr. Numberi iyo Governor-ka Gobolkaas Md. Sinyo Sarundajang, khudbad uu halkaas ka jeediyay Madaxweynaha Indonesia ayuu ku tilmaamay in ay muhiim tahay in la ilaaliyo

kheyraadka badaha, loogana faa'iideeyo shucuubta ilaahay ku galladaystay biyahaas baaxada leh.

Habeenkii 14 May 2009, waxaa casho sharaf soo dhoweyn ah martigeliyay Madaxweynaha dalka Indonesia, xilligaas oo uu si gaar gaar ah ula kulmayay Madaxda wufuuda dalalka ka soo qeybgalay shirkaas. Prof. Ibbi, Ra'iisul Wasaare Ku-Xigeenka oo wafdiga Soomaaliyeed hogaaminayay ayaa gacan qaaday Madaxweynaha Dalka Indonesia, gaarsiiyayna Madaxweynaha Indonesia salaam iyo bogaadin ka timid dhiggiisa Soomaaliyeed, Md. Shariif Sheikh Axmed, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliyeed, isagoo sidoo kale faahfaahin kooban ka siiyay xaalada uu maanta wadanku marayo iyo kaalinta Indonesia looga baahan yahay in ay ka geysato arrimaha Soomaaliya, kana codsaday in ay Indonesai gaarsiiso dhambaalkaas dhammaan dawladaha deriska la ah, maadama ay Indonesia fadhi u tahay urur goboleedka ay bohoobeen dawladaha ASEAN.

Inta uu socday shirkan ayuu Ra'iisul Wasaare Xigeenka la kulmay dawlado farabadan oo ay ka mid ahaayeen: Wasiirka Kalluumaysiag Philippine, Qatar, Malaysia, USA, Australia, Kenya, South Africa, Tanzania iyo dawlado kale oo aan dhamaantood idiin soo gudbin doono kulamadaas iyo sida ay u dheceen haddi rabi idmo.

Xogheynta Wafidga
Manado, Indonesia